Fahmidda IEP

Waa maxay IEP?

IEP waa Barmaamij Qoraal Ah ee Waxbarashada Ilmahaaga oo la diyaariyey, dib loogu noqday, wax laga bedelay kulanka.

Sidoo kale IEP waa:

- Tilmaamaha la raaco ee waxbarashada Ilmahaaga ama ardayda waaweyn.
- Waxa ay kooxda IEP go'aan kaga gaaraan halka uu ilmahaaga ka bilaabayo waxbarashada.
- Waa in la qoraa 30 cisho gudahood oo maalmaha shaqada ah marka ugu horeysa ee ilmahaaga loo aqoonsado inuu u baahan yahay adeegga waxbarashada ee gaarka ah.
- Waa in la fuliyaa bilowga sanad dugsiyeedka.
- Ma aha heshiis khasab ku ah oo la doonayo in dugsiga ama macalimiintu raacaan. Mas'uul kama noqonayaan haddii uu ilmahaagu gaari waayey hadafka loo dajiyey. Hase yeeshee, macalimiinta iyo xirfadlayaasha kale ayaa lagula xisaabtamayaa in ay adeegga u gaarsiiyaan ardayda sida ku qoran IEP.
- Waa in lagu qoraa kulanka dhex mara kooxda oo dhan oo waalidku ka qeyb qaato. Qaar ka mid ah xubnaha kooxda ayaa ka qeyb qaatay qiimeynta iyo nidaamka kala shaandheynta.
- Waa in la qoraa ka hor inta aan ilmaha fasalka la fariisin oo adeegga aan loo bilaabin.
- Waxaa la dajiyaa, dib loogu noqdaa, oo la raacaa sida ay dhigeyso IDEA iyo Sharciyada Waxbarashada gaarka Ah ee Gobolka Utah.

Waa maxay Ujeedada IEP?

1. Waxaa loo adeegsadaa inuu isku xiro waalidka ama ardayga iyo shaqaalaha dugsiga, oo xoojiya ka wada qeyb galka oo si wadajir ah go'aan u wada gaaraan; Ugu horeyn, waa maxay baahida ardayga; midda labaad, waa maxay waxyaabaha la doonayo in ardaygu gaaro, midda sadexaad, waa maxay adeegga ardayga loo qabanayo si loo gaaro hadafkaas.
2. Waxaa loo adeegsadaa fursad lagu xaliyo faraqa u dhaxeeya waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiyada ee ku saabsan baahida waxbarashada gaarka ah ee ardayda

3. naafada ah; ugu horeyn iyada oo loo marayo kulanka IEP, iyo midda labaad, haddii ay muhim tahay, iyada oo loo marayo nidaamka kaasoo ay heli karaan waalidiinta iyo dugsiga.

4. Marka uu yahay qoraal, waxa ay fududeyneysaa in loo diyaariyo waxyaabaha uu u baahan yahay oo ka caawin kara ardayga naafada ah inuu helo waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xiriira.

5. Waxaa loo adeegsadaa in uu arday kasta oo naafo ah ka caawiyo helitaanka adeegga la xiriira ee ku haboon lana xiriira baahidooda waxbarashada gaarka ah.

6. Waa qoraal cadeyn u noqon kara sida loo raacay sharciga ama kor kala socoshada ee shaqaalaha u xilsaaran ee hay'adaha dawladda si loo ogaado in ardayda naafada ah uu helay dhab ahaantii helay adeeg lacag la'aan ah, oo ku haboon ee waxbarashada dadweynaha (FAPE) oo ay ogolaadeen waalidka ama ardayga iyo dugsiga.

Imisa Jeer Ayaa Isbedel Iyo Wax Ka Bedel Lagu Sameynayaa IEP?

Sharcigu waxa uu waajib ka dhigayaa in ugu yaraan la qabto hal kulan sanadkii kaasoo lagu soo saaro qoraalka IEP. Kulanka IEP, waalidka iyo shaqaalaha dugsiga waa in ay si wadajir ah go'aan uga gaaraan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmaha naafada ah taasoo ku saleysan baahida ilmaha sida lagu ogaado qiimeynta. Qoraalka IEP waa mid qoraal ah oo lagu soo koobo go'aanka lagu gaaro kulanka.

Ogeysiiska Kulanka

Waalidka ama ardayga weyn waa in la gaarsiiyaa ogeysiiska kulanka taasoo lagu caddeeyo ujeedada kulanka, waqtiga iyo goobta lagu qabanayo iyo cidda ka soo qeyb galeysa. Waa in sidaa oo kale lagu wargeliyaa xuquuqda waalidku u leeyahay in ay kulanka u soo kaxeysan karaan qof aqoon ama waayo aragnimo gaar ah leh. Ogeysiiska kulanka ee la gaarsiinayo waalidka ama ilmaha weyn (18+) waa inuu:

- Cadeeyaa ujeedada, waqtiga iyo goobta lagu qabanayo kulanka iyo cidda ka soo qeyb galeysa.
- wargeliyaa ogolaashaha ka soo qeybgalka dadka kale ee aqoonta ama waayo aragnimada gaar ah u leh ardayda IEP.

- Ardayda bilaabaya xilliga hore ee waxbarashada, waa in marka waalidiintu codsdaan la wargeliyaa Qeybta C ee xiriiriyaha adeegga ama wakiilada kale ee Qeybta C ee laga yaabo in lagu martiqaadi karo kulanka IEP ee ardayga horay adeeg loogu fidiyey Qeybta C (Adeegga Xilli hore, da'da 0-3).

Ogeysiiska Kulanka Loogu Gudbayo IEP:

Ogeysiiska kulanka ugu horeeya ee IEP waxaa la qabtaa marka ilmaha da'diidsu tahay 14 jir, ama ka yar haddii la go'aamiyo inuu u baahan yahay IEP, iyadoo ay waajib tahay:

- In la cadeeyo in ujeedada kulanku tahay in lagu gaaro hadaf dheeraad ah iyo adeegga ardaygu ugu gudbayo.
- In la cadeeyo hay'adda la shaqeyneysa ardayga.
- In la aqoonsado wakiilada hay'adaha kale ee lagu martiqaadi karo kulanka ka dib marka uu waalidku ogolaado.

Waa Ayo Xubnaha Kooxada IEP?

IDEA waxa ay si cad u tilmaantay shuruudaha looga baahan yahay xubnaha kooxada IEP,
iyo cidda goob joogga ka noqoneysa kulanka oo dhan. Dadka xubnaha ka noqonaya kooxda waxa ay kala yihiin:

- Mid ama labada waalid ama qofka mas'uulka ah ama waalidka ilmuhu la nool yahay iyo ardayga da'da weyn mudada kala guurka (*laga bilaabo sanadka uu gaaro 14 jir) ama ardayda ka yar, marka ay ku haboon tahay.
- Ugu yaraan hal macalin oo waxbarashada gaarka ah ee ardayga, ama marka ku haboon, ugu yaraan hal macalin oo ardayga u fidiya waxbarashada gaarka ah.
- Ugu yaraan hal macalin oo waxbarashada caadiga ah ee ilmaha, haddii uu ilmuhu ka qeyb qaadanayo manhajka waxbarashada ee caadiga ah.
- Wakiil ka tirsan Hay'adda Waxbarashada ee Deegaanka (LEA) oo inta badan ah maamulaha dugsiga ama qof wakiil ka ah. Qof aqoon u leh inuu bixiyo ama kor kala socdo waxbarashada gaarka ah oo aqoon u leh sharciyada guud ee manhajka. Wakiilka LEA waa inuu noqdaa qof aqoon u leh sida loo heli karo adeegga oo awood u leh inuu ogolaan karto adeegga loo baahan yahay, oo ay ka mid yihiin dhaqaalaha, lagu bixinayo adeegga waxbarashada ee ardayga.

- Qof fahmi kara natiijada iyo waxyaabaha ka dhalan kara qiimeynta. Mararka qaarkood qofkan waxaa uu horay uga tirsanaa kooxda, sida macalin oo kale.
- Iyada oo ku xiran go'aanka waalidka ama arday qaangaarka ah ama dugsiga, dadka kale ee aqoonta ama waayo aragnimada gaarka ah u leh ardayda, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha adeegga hadba sida ku haboon (qofka dadka martigelinaya ayaa go'aan ka gaaraya cidda khibradda u leh.)

Ka Qeyb Galka Kooxda IEP

Xubin ka tirsan kooxda IEP lagama doonayo inuu ka qeyb qaato kulan gaar ah ee IEP, gebi ahaantiis ama qeyb ahaan, haddii waalidka ama ardayga qaangaarka ah leeyahay naafanimo oo LEA ogolaato, si qoraal ah, ka qeybgalka xubinta ma aha mid muhim ah waa qeybta manhajka ama adeegga la xiriira ee xubinta waxba lagama bedelin ama sida looga hadlayo kulanka.

Xubinta ka tirsan kooxda IEP waa laga dhaafi karaa ka qeybgalka kulanka IEP, gebi ahaan ama qeyb ka mid ah, marka uu kulanku ku saabsan yahay wax ka bedelka ama dood la xiriirta qeybta manhajka ama adeegyada la xiriira ee xubinta haddii:

- Waalidka ama ardayga qaangaarka ah iyo LEA labadaba qoraal ku ogolaadaan ka dhafidda; oo;
- Xubintu waxa ay u soo gudbisaa, waalidka iyo kooxda IEP, ra'yiga ay ka dhiibaneyso ka hor inta aan la qaban kulanka IEP.
- Ka qeybgalka xubinta ee kulanka kooxda IEP waa in ay noqotaa mid kulan kasta gooni go'aan looga gaaro.

Ka Qeybgalka Iyo Joogitaanka Waalidka

LEA waa in ay qaadaa talaabooyinka lagu xaqiijiiyo in mid ama labada waalid ee ardayga naafada ah ama ardayga qaangaarka ah uu goobjoog ka ahaado kulanka oo IEP ama la siiyo fursadda ay kaga qeyb qaataan, oo ay ka mid tahay:

- Waalidiinta la wargeliyo xilli hore oo ay heli karaan fursad ay kaga qeyb galaan.
- Kulamada oo la qabto waqti iyo goob la isku raacay.
- Haddii aanay labada waalid midna ka qeyb geli karin kulanka, LEA waa in ay adeegsataa dariiqo kale oo lagu xaqiijinayo ka qeybgalka waalidka, oo ay ka mid tahay hab kale oo ay kaga qeyb geli karaan kulanka isda fiidyoow ama telefoonka. Waxaa suurogal ah in waalidka ilmaha naafada ah iyo LEA ku heshiiyaan isticmaalka

habab kale oo waalidku kaga qeyb qaadanayaan kulanka, sida fiidyoowga ama telefoonka.

Waxaa suurogal ah in kulanka la qaban karo iyada oo waalidka ama ilmaha qaan gaarka ah ee naafada ah uusan joogin haddii ay LEA aanay ku guuleysan in waalidku ka qeyb qaataan kulanka. Marka ay sidaas dhacdo, LEA waa in ay diiwaan ka sameeyaan isku dayga suurogalka ah ee ay isku dayeen in ay waalidka heshiis kala gaaraan waqtiga iyo goobta kulanka.

Talo Siin Ku Saabsan Isu Diyaarinta Kulanka IEP ee Waalidiinta

Isu diyaarinta kulanka IEP waxa ay waalidiinta ka caawin kartaa in ay la wadaagaan macluumaadka sida ugu haboon kooxda iyo ka qeybgalka kulanka sida ugu haboon iyo qarsoodi ka dhigista macluumaadka. Ka qeybgalka waalidiinta waa qodob aad muhim u ah go'aan ka gaarista adeegga ku haboon ilmaha.

Waxyaabaha hoos ku xusan waa qaar ka mid ah talooyinka u diyaargaroowga kulanka IEP:

- Ururinta macluumaadka aad la wadaageyso: daawda, cilmi nafsiga, qiimeynta kale, qodobada ku saabsan sida uu ilmahaagu ku yahay guriga, waxyaabaha dugsiga loogu qabto, xaaladda qoyska iyo carqaladaha hor taagan.
- Dib u eeg diiwaanka dugsiga ee ardayga iyo IEP iminka lagu shaqeeyo haddii uu jiro.
- Liis ka samee waxyaabaha aad aragto in ilmahaaga ku wanaagsan yahay.
- Qor waxyaabaha muhimadda kuu leh iyo hadafka mustaqbalka dheer ee ilmahaaga.
- Liis ka qor adeegga aad aaminsan tahay in ilmahaagu u baahan yahay si loo gaaro hadafka aad kor ku sheegtay.
- Qoro su'aalahaaga.
- Hubi kulanka IEP la siiyo waqti ku haboon kulanka si looga doodo wax kasta oo la doonayo in laga hadlo. Noqo qof macquul ah, laakiin haddii uu waqtiga ka dhamado kooxda, waxa aad codsan kartaa in kulan kale la qabto si loo dhameystiro nidaamka.

La xiriir kooxda kulanka ka hor:

- Wargeli cidda kugu martiqaaday kulanka.
- Weydiiso in lagu tuso qoraalka horudhaca ee IEP.
- Waxa aad codsataa in qiimeyn lagu sameeyo xogta.
- Haddii loo baahdo, weydiiso in laguu tarjumo, oo laguugu qoro luqadda aad ku hadasho.
- Wax kasta oo fududeyn ah oo laguu soo qaban karo si aad uga qeyb qaadato kulanka, sida tarjubaanada waxyaabaha laguugu daabaco siyaabo kale.

Sida Ugu Haboon ee Loo Gudbiyo Fariimaha Waalidka

Adiga ayaa ugu haboon in aad ilmahaaga u doodo. Si wanaagsan adiga ayaa u garanaya ilmahaaga. Ha u qaadan in dugsigu hayo dhamaan macluumaadka ilmahaaga. Macluumaadka oo aad la wadaagto kooxda waxa ay ka caawineysaa in kooxdu ay fahmaan ilmahaaga oo ay la yimaadaan xalka ugu wanaagsan.
La hadal ilmahaaga oo ogoow waxyaabaha uu kala kulmo dugsiga iyo sida uu dareemayo.

Waxaa jira qodobo marka laga reebo hadalka oo saameyn ku yeelan kara sida dadka kale u qaatana fariinta. Taas waxaa ka mid ah calaamadaha qofka wajigiisa laga dheehan karo, sida uu erayada ugu dhawaaqo, indhaha, gacan hadalka, iyo sida uu u gudbiyo fariinta. Madaxa ku haay marka aad arrimahan ka qeyb qaadaneyso.

Noqo dhageyste wanaagsan

Qof ku wanaagsan dhageysiga waa qof ...

- doonaya inuu hagaajiyo dhageysigiisa.
- Dhageysta fariinta oo dhan inta aanu ka jawaabin.
- dhageysta nuxurka, ee ma aha sida fariinta laguu soo gaarsiiyo.
- aan ka mashquulin oo xooga saara dhageysiga.
- dhageysta fikradaha asaaska u ah isaga oo u soo jeeda.
- u dhageysta inuu fahmo aragtida dhinaca kale, halkii uu ku mashquuli lahaa inuu jawaab u diraairyo.

Ku raacista sida qofka kale dareemayo

In aad qirto in aad fahamsan tahay sida qofka kale dareemayo oo aad ogaato in aad dareemayso in aad maqashay waxa ay sheegayaan iyo sida ay dareemayaan. Taasi waxa ay caawineysaa in ay dajiso waxyaabaha caqabadaha ku noqon kara in aad fahamtaan.

Itsicaamlka “Aniga” Marka Aad Hadleyso

“Aniga” waa mid lagu cabiro sida aad sareemeyso, waxyaabaha aad dareenka ka qabto iyo waxa aad ku fikireyso. Waxa kale oo ka hortagtaa in dadka kale aad eedeyneyso ama dusha u saareyso waxyaabo aanay sameyn. Marka la adeegsado, dadka kale waxa ay doonayaan in ay ku dhageystaan, maqlaan waxyaabaha aad dareenka ka qabto, oo aad ka wada shaqeysaan sidii aad xal ku wada gaari laheydeen.

Weydii su'aalo

In aad hesho cadeyn:

- waxa ay caawineysaa in aad fahamto waxa laga hadlo.
- waxa ay caawisaa in aad hesho macluumaad dheeraad ah.
- waxa ay fududeysaa in aad ogaato waxyaabaha qofka kale filayo, dareenka ka qabo, ama wax u arko.
- soo bandhigto waxyaabaha la qabtay ilaa hadda oo caawinaya.
- waxa ay caawisaa in laga doodo meelaha aad is leedahay waxa ay u baahan yihiin wax ka qabasho .
- waxa ay caawisaa in aad hesho macluumaadka aad u baahan tahay ka hor inta aadan dhiiban ra’yigaaga ama aadan go’aan gaarin.
- waxaa loo adeegsan karaa in lagu gaabiyo wada hadalka oo lagu siiyo waqti aad ku fahamto macluumaadka.

Muxuu Ka Dhigan Yahay Saxiixaaga:

- Waa in dhamaan ka qeyb galayaashu saxiixaan IEP.
- Dhamaan saxiixyada IEP waxa ay tusayaan ka qeybgal iyo joogitaanka kulanka.
- waalidiintu waxa ay IEP ku qori karaan “in aysan ku raacsaneyn” ama dareen ka qabaan.